



Somaliska

Ma uur ayaad leedahay mise ma umushay dhowaan? Codkaaga ka dhig mid la maqalo!

KA QAYBQAADO SAHANKA UURKA

Haddii aad uur leedahay ama dhowaan aad dhashay, waxaad ka qayb geli kartaa Sahanka Uurka oo aad ka jawaabi kartaa su'aalaha ku saabsan aragtidaada ku aadan adeegyada daryeelka caafimaadka iyo caafimaadkaaga muddada aad uurka la'hayd, dhalamadaada kadib iyo hal sano marka aad dhashay ka dib. Uur kasta iyo dhalmo kastaaba waa mid gaar ah, sidaa darteed ka-qaybgalkaagu waa noo muhiim.

Daraasadda uurka waxaa loo qaybiyay saddex qaybood oo kala gooni ah. Dhammaan qaybaha oo dhanna waxaa laga heli karaa bogaggaaga gaarka ah ee barta internetka ee <https://www.1177.se>.

Waxaa lagu weydiin doonaa inaad ka jawaabto seddex jeer:

- Markaad uur leedahay usbuuca 25 aad;
- Sideed toddobaad kadib markaad umushay ka dib; iyo
- Markay hal sano ka soo wareegtay markii aad dhalashay ka dib.

Waa lagugu soo dhaweynayaa inaad dhameystirto/buuxiso seddexda qaybood ee ra'yi ururinta, laakiin uma baahnid. Tusaale ahaan, haddii aad u mushay qiyaastii hal sano ka hor, waxaad dooran kartaa inaad buuxiso qaybta ugu dambaysa kaliya. Qayb kasta waxay qaadataa ugu yaraan shan daqiiqo in la buuxiyo, oo waxaadna heli doontaa lix toddobaad oo aad ku buuxiso laga bilaabo marka aad hesho foomka xog-waraysiga.

Sida looga qeybgalo:

1. Booqo boggeena internetka <https://www.1177.se>.
2. Guji "Logga in" oo ku taal qaybta kor ee bogga.
3. Guji "Logga in" oo ku taal qaybta dhexe bogga, halkaasoo ay ku taal astaan fure ah.
4. Xullo qaab aqoonsi, sida "Mobilt Bank-ID" si aad ugu isticmaasho aqoonsiga elektarooniga ah (e-identification) ee taleefankaaga gacanta.
5. Guji "Inställningar" oo magaaca hoos tiistiisa, ee bogga qaybta kor.
6. Gali faahfaahintaada xiriirka. Xulo haddaad rabto inaad ka hesho ogeysiisyo ka socda 1177 ("Avisering från 1177 Vårdguiden") iimeel iyo/ama fariin qoraal ah iyo in kale. Guji "Spara" oo ku taal qeybta hoose ee bogga.

Mar haddii aad ku qorto faahfaahintaan, waxaad heli doontaa farriin markasta oo aad dhammaystirto qayb cusub oo sahanka ah.

Xogtaada shaqsiyadeed waa la ilaalinayaa ama la dhowrayaa

Kaqeyqaadashada sahanku waa mid ikhtiyaari ah, oo wixii jawaabcelin ah la la ma xifiirin doono xogta qofka. Natiijooyinka isku-darka ah ee ka soo baxay Daraasadda Uurka waxaa loo isticmaali doonaa oo aassaas looga dhigi doonaa in lagu horumariyo adeegyada daryeelka caafimaadka.

Haddii aad qabtid arrimo caafimaad ama taageero u baahan tahay inta uurka leedahay ama aad umusho kadib, fadlan la xiriir umulisadaada ama rugta caafimaadka.

Waad ku mahadsan tahay ka qaybqaadashadaada.